Qoraalkan waxaa lala isticmaalayaa qoraalka PowerPoint-ga ah ee Baro goobaha lagu kulmo ee dhigitaalka ah. Lambarrada qodobaddu waxay u dhigmaan kuwa PowerPoint-ga. Qodobka 1-aad wuxuu u dhigmaa warqadda 1-aad (bogga 1-aad) ee PowerPoint-ga,
Qodobka 2-aad na bogga 2-aad inta kalena waa sidaas oo kale. Waraaq walba isla qoraalkaas ayaa hoosta uga qoran.

Qoraalka ku qoran **xarfaha dhalaalaya** waa faallo ku socota qofka koorsada bixinaya. Qoraalka ku qoran XARFAHA WAAWEYN waa cinwaan. Qoraalka intiisa kale kor ayaa loo akhrin karaa ama waxaa looga tilmaan qaadan karaa waxa uu oran doono qofka koorsada bixinaya markuu cashirka dhigayo.

Qoraalka

0. **Hadafka waxbarashada:**

In fiidiyow ama fiidiyow-la'aan qof la wici karo

In qof ku soo wacay laga qaban karo

In layska diido karo in laga qabto qof ku soo wacay

In codka iyo sawirka la daari karo ama la demin karo marka la hadlayo

In la demin karo marka hadalka la dhammaysto

1. **Hadafka waxbarashada u dulmar ka-qaybqaatayaasha ka hor intaadan waxbaridda billaabin. Waxay u fududaynaysaa barashada iyo xusuusashada waxyaalihi ay barteen.**

2. WAA MAXAY GOOBAHA KULANKA EE DHIGITAALKA AH?

3. Goobaha kulanka ee dhigitaalka ah waa adeegyo kala duwan oo aad dadka wici karto, fiidiyow kula hadli karto ama aad kula jaadi karto adigoo internetka isticmaalaya.

Goobaha kulanka ee dhigitaalka ah waxaa ka mid ah Teams, Zoom, Facetime, Messenger iyo Skype. Dad badan ayaa isticmaala goobaha kulanka ee dhigitaalka ah maaddaama ay bilaash tahay in dadka laga waco iyo in fiidiyow lagula hadlo waddan kasta oo la joogo. Waa bilaash mar haddii aad wi-fi haysato.
Goobaha kulanka ee dhigitaalka ah waxaad ka helaysaa kombiyuutarka gacanta, telefoonnada casriga ah ama kombiyuutarkaaga. Qalabka aad isticmaalayso adiga ayaa dooraya.

4. QALAB

5. Wadahadalka fiidiyowga ayaa ah midka ugu badan ee lagu isticmaalo goobaha kulanka ee dhigitaalka ah. Waad arki kartaa oo maqli kartaa dadka aad la hadlayso, ayaguna waa ku arki karaan oo waa ku maqli karaan.

6. Kombiyuutarka gacanta iyo telefoonnada casriga ah labaduba waxay leeyihiin shaashad, kaamarad, makarafoon iyo sameecad suurtaggal ka dhigaya in fiidiyow lagu

wadahadlo. Kombiyuutarrada la qaadan karo ee casriga ah badankooduna way leeyihiin.

7. In sameecadda dhegaha oo makarafoon leh la isticmaalo ayaa dadka qaar u wacnaan karta, laakiin waa ikhtiyaari. Kombiyuutarrada la qaadan karo, kombiyuutarrada gacanta iyo telefoonnada casriga ah dhinacyada ayay ku leeyihiin meelo qalabkaas laga geliyo.

8. Qof kasta waa inuu helaa internet lagu galo goobta kulanka ee dhigitaalka ah - haddii ay ahaan lahayd teams, zoom, facetime, messenger ama goobo kale.

9. ABKA LA SOO DEG

10. Dooro goobtaada kulanka oo abka kula soo deg telefoonkaaga casriga ah ama kombiyuutarkaaga casriga ah. Qaar kuwan ka mid ah ayaad koonto ka samaysan kartaa ama aad geli kartaa.
**Hubi in dhammaan lala soo degay abka ka hor intaan cashirka horey loo sii socon. Eeg goobaha kala duwan ee ay dadku hadda haystaan. Dadka iphone-ka haysta waxay isticmaali karaan facetime. Kuwa facebook lehna waxay isticmaali karaan messenger. Haddii aad rabtana dooro mid ka mid ah kuwa kale oo aad kulligiin koorsada ku wada isticmaali kartaan.**

11. DIRIDDA AMA QABASHADA

12. Teams, Facetime, Messenger iyo qaar kaleba dadka liiska kuugu jira ayaad kala soo bixi kartaa qofka aad rabto inaad wacdo ama waxaad ka raadin kartaa abka.

13. Markaad hesho qofka aad rabto inaad la hadasho ayaad riixaysaa kaamiradda fiidiyowga ama calaamadda telefoonka ee shaashadda si aad qofka u wacdo.

14. Haddii aad telefoonka riixdo markaas waxaad wacaysaa adigoo aan sawir arkayn oo waxaad ula hadli kartaa sidii adigoo telefoon caadi ah kula hadlaya oo kale.

15. Haddii aad kaamiradda riixdana waxaad wacaysaa adigoo fiidiyowga toos lagaaga arkayo.

16. Marka lagu soo waco waxaad maqlaysaa codka dhicidda, shaashaddana sawirkaan ayaad ku arkaysaa.

**17.** Haddii aad riixdo batooonka cagaaran ee gacanta telefoonka u eg markaas waad ka qabatay qofki ku soo wacay, laakiin qofku codkaaga oo keliya ayuu maqlayaa ee fiidiyow kuguma arki karo intaad wada hadlaysaan.

**18.** Haddii aad riixdo batoonka cagaaran ee sawirka kaamiradda markaas waxaad wadahadli kartaan adinkoo is arkaya haddaad labadiinnuba haysataan qalabkii loo baahnaa.

**19.** Haddii aad riixdo batoonka guduudan markaa waad ku demisay qofki ku soo wacay.

**20.** Sawirka shaashaddaada sidaan oo kale ayuu u ekaanayaa. Sawirka qofka aad la hadlayso oo weyn ayaa shaashadda kuu soo gelaya, geeska midigta ah ee hoosana waxaa soo gelaya sawirkaaga oo yar.

**21.** Sawirkaagu waa isla midka qofka aad la hadlayso shaashaddiisa u soo gelaya.

**22.** Sidaas oo kale ayuu noqonayaa qofka aad la hadlaysana. Sawirkaaga oo weyn ayaa shaashadda u soo gelaya, sawirkooda aad adigu aragtana oo yar ayaa ayagana u gelaya midigtooda hoose.

**23.** Calaamado ayaad had iyo jeer ku aragtaa shaashadda kombiyuutarka.

**24.** Haddii aad hal mar riixdo shaashadda kombiyuutarka ama midda telefoonka casriga ah isla calaamadahaas ayaa kuu soo baxaya.

**25.** Haddii aad riixdo sawirka kaamiradda qofka aad la hadlayso kuma arki karo.

**26.** Haddii aad isla batoonkii mar kale riixdana sawirkii ayaa soo noqonaya.

**27.** Haddii aad sawirka makaroofanka hal mar riixdana qofku hadalkaaga maqli maayo.

**28.** DEMINTA

**29.** Haddii aad mar kale riixdana codki ayaad maqlaysaa.

**30.** Batoonka guduudan taabo si aad u demiso.

**31.** DHAMMAAD